Barnaamijka ku meel gaarka ah ee Shaqada tayada Wanaagsan leh ee Koonfurta iyo Bartamaha Somaaliya (CSZ). Placina Hotel,

Nairobi Kenya 23kii Abriil, 2009ka

Iyadoo qeyb ka ah dadaal muddo socday oo loogu talagalay in lagu diyaariyo Barnaamijka ku meelgaarka ee shaqada tayada wanaagsan leh ee Soomaaliya, waxaa lagu qabtay hoteelka Placina ee magaalada Nairobi 23kii April, 2009ka shir ay ka qeb galayaan dhamaan xubnaha bulshada ee wada shaqeynta kala dhexeyso ILO Somaaliya.. Shirka waxaa ka soo qeyb galay xubno matalaya Dawladda ku meel gaarka ah oo uu hogaaminayo Mudane Mohamed Abdi Hayir oo ah Wasiirka Shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha, Saraakiil ka socota Xafiiska ILO Soomaaliya oo uu hogaaminayo Alexio Musindo, Agaasimaha aagga Bariga Afrika sida (Keenya, Soomaaliya, Ugaandha iyo Tanzaaniya) iyo xubno matalaya Bulshada Rayadka ah, hayadaha gaarka loo leeyahay iyo hayadaha culuunta sare ee koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya.

Furitaankii Shirka

Agaasimaha aagga bariga afrika wuxuu uga mahad celiyay wasiirka ka qsoo qeyb galkiisa shirka, wuxuuna halkaa ka caddeeyay sida ILO ay uga qo'antahay in ay la shaqeyso una shaqeyso ummadda Somaaliyeed. Waxaa kale oo uu halkaa ugu soo gudbiyey salaan uu uga siday Agaasimaha ILO ee qaaradda Africa Mr, Charles Dan.

Ka dib, agaasimaha wuxuu si kooban ugu wargeliyay ka qeyb galayaashii shirka in ILO ay u dabaal degeyso sanad guuradeedii 90aad tan iyo markii la aasaasay, taasoo halkudhigeeduna yahay "Dadaalka 90ka sano ah ee ku wajahan in la helo cadaalad dhanka Bulshada ah"iyo in shirkan loogu yeeray si horay loogu sii ambaqaado diyaarinta barnaamijka shaqada tayada wanaagsan leh. Xilli ay socdaan dabaaldegyadaas. Wuxuu kaloo u sheegay ka qeybgalayaasha shirka in 46 waddan oo Afrika ka tirsan, xubinna ka ah ILO ay iyagana sidoo kale u dabaaldegayaan sandguuradan ayadoo dhammaantood culeyka la saarayo barnaamijka Shaqada tayada wanaagsan leh.

Wuxuu sii watay hadalkiisii isagoo sharaxay in Barnaamijka kumeel gaarka ah ee shaqada tayada wanaagsan leh (I-DWCP) uu yahay mid wadajir ah oo u dhexeeya ILO iyo Bulshada Somaaliyeed. Wuxuu kama dambeystii ka dhawaajiyay in shirkan maanta uu astaan u yahay talllabo taariikhi ah oo horey loogu qaaday sidii loo gaari lahaa in dhammaan ragga iyo dumarka Soomaaliyeed ay helaan Shaqo tayo wanaagsan leh.

Wasiirka Shaqada iyo horumarinta Shaqaalaha ayaa wuxuu ugu hambalyeeyay ILO taageerada ay horey ugu fidisay Sooomaaliya . Wuxuu kama dambeystii halkaa ka sheegay in diyaarinta Barnaamijka shaqada tayada wanaagsan leh (I-DWCP) uu yahay tallaabo taariikhi oo loo tallaabsaday sidaaii loo taageeri lahaa barnaamijka horumarinta, Nabad ka dhalinta iyo dib u dhiska Soomaaliya.

Wasiirka wuxuu ku nuuxnuuxsaday sida loogu baahanyahay in sare loo qaado taageerada ay hay'adaha caalamiga ah ee horumarinta u fidinayaan Soomaaliya. Wuxuu dhiiri gelyay in baahida loo qabo wax qabad dhab ah oo la sameeyo xilliga loo baahanyahay kaasoo taageeraya dadaalka loogu jiro dib u dhisidda somaaliya.

Waxaa kale oo uu wasiirka sharaxay in ahmiyadda ugu horeysa ay dawladdu siineyso sidii shaqoo loogu abuuri lahaa dadka, gaar ahaan dhallinta da'da yar iyo kuwa horey uga tirsanaa ciidamo beeleedyada, si looga hawlgeliyo hawlo wax soo saar leh oo ka wanaagsan wixii horey ay usameyn jireen.

Wuxuu caddeeyay baahida loo qabo in shaqaalaha dowladda loo sameeyo tababaro sare loogu qaadayo aqoontooda iyo in la dayactiro ama la dhiso xarumo tababarro oo xirfadaha dadka kor loogu qaado. Wuxuu kaloo ka codsaday ILO ay ka taagerto dawladda sidii loo xoojin lahaa nidaamka saddex geesoodka ah maadaama xaaladda hadda jirta ee Soomaaliya aysan jirin ururro shaqaale oo oo kulmiya wakiilna ka shaqaalaha. Iyo loo shaqeeyaha. Wuxuu ku baaqay in la sameeyo qorshe hawleed ku aadan in shaqo abuuris deg deg laga sameeyo Soomaaliya.

Kama dambeyntii wuxuu uga mahad naqay ILO soo abaabulidda shirkan muhiimka iyo hayadaha wadaniga ka soo qey galkooda. Ka dibna wuxuu halkaa kaga dhawaaqay shirka in uu furan yahay.

<u>Furitaankii Shirka ka dib</u>

Ka dib markii ay ka munaaqishoodeen warqaddii lagu soo bandhigay fikirka saldhiga u ah Barnaamijka shaqada tayada wanaagsan (I-DWCP concept paper) iyo xaaladda uu wadanka ku suganyahay, waxay ka soo qeyb galayaasha soo jediyeen kuna heshiiyeen in arrimaha muhiimka ah oo ay u arkaan in lagu daro barnaamijka shaqada tayada wanaagsan ee somaaliya (I-DWCP) ay yihiin sida soo socota

1. In la abuuro Shaqo

Waxay soo jeediyeen In diiradda la saaro oo muhiimad gaar ah la siiyo dadka tabarta daran sida dhallinyarada, curyaamiinta iyo dhallintii horey uga mid aheyd ciidamo beeleedyada si ay u helaan hab kale oo ay noloshooda ku maareeyaan.

Waxay ku baaqeen in la dayactiro and lana horumariyo xarumo dadka lagu siiyo tababarro kuwaasoo ay ka mid yihiin xarumaha waxbarashada dadban (Vocational training centers) si dhalinyarada iyo ciidamo beleedyada loo hroumariyo xirfadood shaqo loona taageero hub ka dhigista. Dayactir lagu sameeyo macadyada bixyada aqoonta heerka sare ee sida jaamacadaha ayaa iyana loo aqqonsaday in ay muhiimad weyn leedahay.

Waxaa la aqoonsaday in awooda ganacsiga gaarka lool leeyahay sare loo qaado ay muhiim tahay si ay u abuuraan fursado shaqo, gaar ahaan dhallinta da'da yar.

Waxaa la qoonsaday in baahi weyn loo qabo in la sameeyo mashaariic ku slaeysan adeegsiga xooga shaqaalaha sida dhismaha/ dayactirka/hagaajinta wadooyinka, howlaha biyaha, maareynta qashinka kuwaasoo hawgelin kara shaqaalle fara badan.

Waxaa la aqoonsaday in Baahi loo qabo furasado malgelino yay yar la helo si loo tageero ganacsiyada yaryar iyo kuwa heerka dhexe oo ay ka mid yihiin sida soo saaridda malabka, dalagga beeraha, kalluumeysiga, soo saaridda cusbada, tolliinka dharka iyo farsamo gacmeedka.

2. In La taageero nidaamka Saddex Geesoodka Ah

Waxaa la aqoonsaday in Somalia Hadda aysan laheyn ururro bulsho oo kulmiya ama matala Shaqaalaha guud ahaan iyo loo shaqeeyayaasha.

Waxaa Lagu talo bixiyey in dadka lagu baraarujiyo muhiimadda ay leeyihiin ururada shaqaalaha iyo kuwa loo shaqeeyayaasha si loo soo bandhigo xuquuqda shaqaalaha ay leeyihiin.

Wxaa la soo jeediyey in la sameeyo urruro shaqaale iyo kuwa loo shaqeeyayaasha si loo helo nidaamka saddex geesoodka ah.

3. Maamulka arrimaha shaqaalaha oo ay ka mid tahay nidaamka caalamiga ah ee u degsan shaqaalaha (Labor standards)

Waxaa la aqoonsaday in 188 nidaam ee caalamiga ah oo u degsan shaqaalaha aduunka ay Somaaliya ka aqoonsatay wax yar oo keliya loona baahanyahay inta dhiman in la aqoonsado lana hirgeliyo.

Waxaa lagu baaqay in la taageero dib ugu noqoshada iyo dhameystirka shuruucda shaqaalaha Soomaaliya kuwaasoo markii ugu dambeysay ee lee eego ay aheyd 1972dii.

Waxaa la dhirrigeliyey in ragga iyo dumarka ay si siman u helaan fursadaha shaqaaleynta.

4. Xog ururin lagu sameeyo Suuqa shaqaalaha.

Waxaa la soo jeediyey in xog ururin suuqa shaqaalah ah la sameeyo si loo wargeliyo wasaaeradda iyo kuwa kale ee daneynaya xaaladda dhabta ah ee manta ka jirta suuqa shaqaalaha soomaaliya si ay ula socdaa Baahida shaqaale ee jirta iyo shaqaalaha la heli karo. Xogtan waxay dad ka caawineysaa in la ogaado barnaamijyada muhiimada sare leh si loo taageero loona caawiyo dib u hagaajinta urrurad shaqaale ee hadda jira.

Ka dib xubnaha shirka ka soo qeyb galey waxay guddonsadeen in nattiijada la filaayo in la gaaro ay yihiin kuwa soo socda

- Fursadaha Shaqo abuuris oo la kordhiyo
- Ammaanka iyo nabadda oo wanaagsanaada
- Is maamul wanaagsan, adeeg bulsho iyo la xisaabtanka maamulka oo wanaagsanaada

- In wax lagu kordhiyo sinaanta xuquuqda, cadaalad bulsho iyo difaaca kuwa tbarta daran
- Nidaamka xuquuda shaqaalaha oo la horumariyo.
- Nolosha oo horumarta taasoo yareyneysa fakhriga, kordhineysa helidda cuntada iyo caafimaadka iyo deegaanka oo horumara.
- Kaabayaasha nolosha oo horumara taasoo keeni karta in wax soo ssarka iyo adeega oo horumara.
- Socdaalka dhllinyarada oo yaraada
- Jawiga maalgelinta oo wanaagsanaada
- Awoodda aqooneed ee hay'adaha deegaanka oo horimarta si ay u samaayaan barnaamijyo wax ku ool ah.
- Heerka ka warqabka shaqaalaha iyo loo shaqeeyayaasha ee arrimaha la xiriira xuquuqdooda oo horumarta.

<u>Xiritnkii shirka</u>

Waxaa lagu heshiiyey sida soo socta.

- ✓ Waxaa lagu heshiiyey in Wasaaradda shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha ay u ololeyso talloyinka ka soo baxay shirka dhamaan masraxyada caalamiga ah iyo kuwa waddanka gudihiisa.
- ✓ Waxaa lagu heshiiyey wixii shirar dambe laga soo qeybgeliyo dhammaan kuwa danaha ku leh arrimahaaan (Satakeholders)
- ✓ Waxaa loggu hambalyeeyay halkaas haya'dda ILO Soomaaliya iyo xubnihii ka soo qeybgalay shirka.
- ✓ Dhaamaan xubnaha waxay taageeren ayna qaateen qodobada ka soo baxay shirka.
- ✓ Kama dambeystii Agaasimaha guud ee wasaaradda ayaa xiray shirkii isagoo metelaaya Wasiirka.

Waxaa lagu qabtay Nairobi, Kenya taariikhdu Markey aheyd 23kii April, 2009ka . Waxaa laga diyaariyey laba nuqul mid ingiriis ah iyo mid Soomaali ah lbada nuqulna waa qoraalkii saxa ahaa.